Ku soo dhawow!

Fasalka lix jirka, dugsiga hoose/dhexe iyo dugsiga xilliga firaaqada

Tusmada buugga

Fasalka lix jirka

Tallaabada koowaad ee gelitaanka dugsiga 7
Doorashada dugsiga 7
Dugsi ku wareegis sahlan 7
Maalin caadiya oo fasalka lix jirka ah 7
Hawlaha waxbaridda 8
Adigu waalid ahaan muhiim baad tahay 8
Kulanka horumarka 9
Sharciyada xukuma fasalka lix jirka 9
Meel deggen oo dhaqan wanaagsan leh 9
Caafimaadka ardayga 10
Ilmahaagu caymis ayuu ku jiraa 10

Dugsiga hoose/dhexe

Dhammaan carruurtu waa in ay tagaan dugsiga hoose/dhexe 13
Xiisaha waxbarasho – waa u muhiim nolosha oo dhan 13
Dugsi gaar ah 13
Soo qaddimaada bilaabista dugsiga hoose/dhexe 14
Dadka waawayn ee ka shaqeeya dugsiga 14
Kulanka horumarka iyo xaqa saamayn ku yeelashada 14
Gaadiidka dugsiga 15
Afka hooyo oo aan ahayn af iswidhish 15
Caawimo gaar ah 16
Haddii aad rabto in aad beddesho dugsiga hoose/dhexe 16
Takhasusyo 16
Dugsiyada hoose/dhexe ee gaarka loo leeyahay 17
Maxaa xukuma dugsiga hoose/dhexe? 17

Dugsiga xilliga firaaqada

Noocyada daryeelka 20
Carruurta ah da´da dugsiga hoose/dhexe 20
Waa maxay dugsiga xilliga firaaqadu? 21
Maxaa xukuma dugsiyada xilliga firaaqada? 21
Codsiga 21
Dugsiga xilliga firaaqada ee fasaxyada iyo maalmaha waxbarashada macallimiinta 21
Xannaanada habeenka 22
Waa immisa kharashku? 22
Soo celinta lacagta xannuun dartii 22
Keen wakhtiyada 23
Maalmaha qorshaha ee shaqaalaha 23
Iska dhiibista booska 23

Erayada iyo sharaxaadda

Sharciga dugsiga

Waxa go´aamiya golaha wakiilada waxanu sheegayaa himilada guud ee waxbarashada iyo xeerarka habka loo qaabaynayo hawsha.

Qorshaha saacaddaha

Waxa go´aamiya golaha wakiilada waxanu sheegayaa wakhtiga go´an ee ay ardaydu xaqa u leeyihiin in macallin wax u dhigo.

Qorshaha waxbarashada – Lgr11

Qorshaha waxbarashada qaranka ee fasalka lix jirka, dugsiga hoose/dhexe iyo dugsiga xilliga firaaqada oo ay go´aamiso dawladdu kaas oo sheegaya himilada aasaasiga ah iyo xeerarka iyo waliba waxyaalaha tiirarka u noqonaya hawlaha.

Qorshaha koorsooyinka

Qayb ka mid ah Lgr11 oo sheegaya himilada waxbarashada ee maaddooyinka kala duwan.

Qorshaha shaqada

Dugsiyada hoose/dhexe waxa ay go´aamiyaan qorshaha shaqooyinkooda u gaarka ah. Waxanu sheegayaa sida dugsigu u shaqayn doono sannadka soo socda.

Qorshaha horumarka qofka (IUP)

Qorshe qoraal ah oo ku sahabsan sida ardaygu ku gaadhayo himilada koorsooyinka dugsiga. Waxa wadajir u sameeya ardayga, macallinka iyo waalidka.

Dugsiga xilliga firaaqada

Nooca ugu caadisan daryeelka wakhtiga dugsiga ka hor ama ka dib waa dugsiga xilliga firaaqada.

Xannaano waxbarasho oo kale

Xannaanada waxbarasho ee carruurta dugsiga waxa loo samayn karaa hab kale oo aan ahayn dugsiga xilliga firaaqada, sida tusaale ahaan xannaanooyinka guryaha.

Fasalka lix jirka

Bilaabista fasalka lix jirku waa tallaabada koowaad ee gelitaanka dugsiga. Wakhti xiiso iyo xamaasad leh ayaa u bilaabmaya carruurta iyo waalidiintaba.

Annaga oo ah degmada Örebro waxa aanu aad u sugaynaa in aanu ilmahaaga ku soo dhawayno dugsiyadayada hoose/ dhexe.

Tallaabada koowaad ee gelitaanka dugsiga

DIlmahaagu waxa uu bilaabi karaa fasalka lix jirka dayrta isla sannadka uu noqonayo lix jir. Dhigashada fasalka lix jirku ma aha qasab waana bilaash.

Fasalada lix jirku waxa ay ku dhexyaalaan dhismayaasha dugsiyada hoose/dhexe. Sannad dugsiyeed kasta ka hor waxa dhammaan lix jirrada loo soo diraa warbixin ku sahabsan dugsiga ay ku qoran yihiin.

Doorashada dugsiga

ADhammaan carruurtu waxa ay leeyihiin dugsi ay ku qoran yihiin, taas oo macnaheedu tahay in ilmuhu ku leeyahay dugsiga boos la hubo. Dugsiga aad ku qoran tahay wuxu ku xidhan yahay adarayska ilmaha ugu jira diiwaanka degmada. Sidaa daraadeed xanaanada caruurta ee uu ilmuhu tagaa saamayn kuma laha dugsiga ilmaha qaadan doona.

Haddii aad rabto in aad u beddalato dugsi kale oo dawladeed oo aan ahayn midka aad ku qoran tahay, isticmaal waraaqda la socota warbixinta loo soo diro caruurta bilaabaysa fasalka lix jirka. Codsiga beddelaaddu waxa uu ku jiraa www.orebro.se, halkaas oo aad ka akhrisan karto warbixin dheeraad ah oo ku sahabsan doorashada dugsiyada.

Dugsi ku wareegis sahlan

Fasalka lix jirku macnihiisu waa kala wareegis sahlan oo u dhaxaysa xannaanada caruurta iyo dugsiga hoose/dhexe. Inta badan waxa jirta wadashaqayn wanaagsan oo ka dhaxaysa fasalka lix jirka iyo fasalka koowaad, si ay caruurtu si dabiici ah ula qabsadaan dugsigooda cusub iyo shaqaalaha ka shaqeeya halkaas.

Maalin caadiya oo fasalka lix jirka ah

Fasalka lix jirka waxa inta badan hawlihiisu qabsoomaan gellinka hore, maalintana waxa lagu soo gebagebeeyaa qado la wada cuno. Gellinka dambe caruur badan ayaa tagta dugsiga xilliga firaaqada. Waxa uu ku oolli karaa isla dhismaha fasalka lix jirka ama dhismayaasha kale ee dugsiga.

Hawlaha waxbaridda

Fasalka lix jirka waxa la isticmaalaa hababka shaqada ee xannaanada caruurta iyo dugsiga labadaba. Hawlaha waxbariddu waa in ay dhiirigeliyaan ilmaha horumarkiisa iyo waxbarashadiisa.

Macallimiintu waxa ay dhiirigeliyaan ilmaha hindihiisa iyo rabitaankiisa, iyo marmarka qaarkood abuurista jeclaysiga iyo xiisaha waxyaalaha iyadoo ay u soo bandhigayaan si soo jiidasho leh.
Ciyaartu waxa ay wali qiimo badan u leedahay horumarka ilmaha.

Marka la jiro lix sano inta badan way adag tahay in si deggen loo fadhiyo, wax la dhagaysto iyo in la sugo markaaga – waa wax ay caruurtu u baahan yihiin in ay ku sii tababartaan ka hor bilowga dugsiga. Marka caruurta la kulmiyo maalintii waxa ay carruurtu ku tababartaan tusaale ahaan in farta la taago, la sugo markaaga iyo in kuwa kale loo ogolaado in ay hadalka dhammaystaan.

Adigu waalid ahaan muhiim baad tahay

Adiga waalidka ah ayaa ilmahaaga ugu aqoon badan. Si ilmahaagu u wanaagsanaado oo sida ugu wanaagsan uga helo fasalka lix jirka waa muhiim in aad ka qaybqaadato waxbarashada ilmahaaga iyo in aad dareento in aad haysato fursad aad kaga qaybqaadato oo saamayn ku yeelato.

Hab aad uga qaybqaadan karto waalid ahaan, waa adiga oo ku biira guddiga waalidiinta ee dugsiga ka jira. Waxa kale oo lagugu casuumayaa kulanka waalidiinta ugu yaraan hal mar teeramkiiba. Kulanka waalidiinta waxa aad ka helaysaa warbixinno ku sahabsan waxyaalaha ka dhacaya fasalka lix jirka, waxana aad haysataa fursad aad su´aalo ku waydiiso ama aad ku soo bandhigto arrin aad u aragto in ay tahay muhiim.

Dabcan wakhti kasta waad la hadli kartaa shaqaalaha fasalka lix jirka haddii aad su´aalo hayso.

Kulanka horumarka

Teeramkiiba hal mar ayaa la qabtaa kulanka horumarka, markaas oo adiga, ilmahaaga iyo ilmaha macallinkiisu aad kulmaysaan oo ka wadahadlaysaan sidii ilmahaagu uu uga heli lahaa fasalka lix jirka. Waxa aad samaynaysaan himilada, oo macnaheedu tahay go´aaminta waxa ilmuhu u baahan yahay in uu ku tababarto mustaqbalka dhaw.

Haddii inta lagu jiro fasalka lix jirta la sii ogaado meelaha uu ilmuhu u baahan yahay in laga xoojiyo waxa uu ilmuhu helayaa fursad wanaagsan oo uu hadhow ku gaadhi karo himilooyinka dugsiga hoose/dhexe.

Sharciyada xukuma fasalka lix jirka

Xeerarka guud ee dugsiyada ayaa xukuma fasalka lix jirta laftiisa. Qorshaha waxbarashada ee dugsiga qasabka ah (Lgr11) waxa uu khuseeyaa fasalka lix jirka laftiisa. Fasalka lix jirku waa qayb ka mid ah dugsiga waana tallaabada koowaad ee fulinta iyo gaadhitaanka himilada qorshada waxbarashada. Ma jirto laakiin himilo aqooneed oo la rabo in la gaadho fasalka lix jirka.

Inta badan isla maamulaha dugsiga hoose/dhexe ayaa maamule u ah fasalka lix jirka.

Meel deggen oo dhaqan wanaagsan leh

Dhammaan carruurtu waa in ay dareemaan deggenaansho fasalka lix jirka. Dugsigu uma dulqaato ficillada meel ka dhaca ah nooca ay doonaanba ha ahaadaane. Dugsiyada oo dhammi waxa ay leeyihiin qorshaha xasiloonaanta oo sharxaya sida looga hortagayo meel ka dhaca iyo waxa la samaynayo haddiiba ay dhacdo. Qorshaha xasiloonaanta waxa aad ka helaysaa bogga Internet-ka dugsiga.

Dugsigu wuxu leeyahay habdhaqan ay dhammaan shaqaaluhu tixgeliyaan. Dhammaan dadku way siman yihiin, hablo iyo wiilal, ragga iyo dumarku waa in ay helaan xuquuq iyo fursado siman. Axdiga caruurta ee Qaramada midoobay waa in uu sal u noqdaa shaqada, waxa carruurta iyo ardayda u wanaagsan waa in la siiyaa mudnaanta koowaad.

Caafimaadka ardayga

Dhammaan ardayda fasalka lix jirka ilaa dugsiga sare waxa ay helaan daryeelka caafimaadka dugsiga, oo ah kalkaaliso iyo dhakhtar. Daryeelka caafimaadka dugsiga shaqadoodu waa in ay la socdaan horumarka jidhka ardayda, iyo helitaanka caafimaad wanaagsan, deegaan shaqo oo wanaagsan iyo caadooyinka nolosha oo wanaagsan.

Shaqada ka hortagga ah waxa ku jira baadhitaanno caafimaad, kuwaas oo ay ka mid yihiin miisaamid, qiyaasid, baadhitaanka aragga iyo baadhitaanka dabarka. Baadhitaanka caafimaadka waxa kale oo ka mid ah wadahalka caafimaadka oo arrimaha caafimaadka ee ilmaha u gaarka ah lagaga hadlo. Sannad dugsiyeedka laba ilaa sagaal waxa la bixiyaa tallaal.

Shaqaalaha dayeelka caafimaadka dugsigu waa ay xaqidaan sirta qofka si ay u ilaaliyaan sharafta adiga iyo ilmahaaga. Warbixin dheeraada oo ku sahabsan caafimaadka iyo taakulaynta ka akhriso www.orebro.se.

Ilmahaagu caymis ayuu ku jiraa

Dhammaan carruurta fasalka lix jirka, dugsiga iyo dugsiga xilliga firaaqada waxa ay ku jiraan caymiska shilka afar iyo labaatanka saacadood. Warbixin dheeraad ah oo ku sahabsan caymiska ka akhriso www.orebro.se, halkan waxa kale oo ku jira codsiga wargelinta dhaawaca.

Dugsiga hoose/dhexe

Degmada Örebro waa in mar kasta tixgelinta koowaad la siiyaa waxa u wanaagsan carruurta iyo ardayda.

Dimoqraadiyadda, ka qaybqaadashada iyo awood ku yeelashadu waa in ay si cad uga dhexmuuqdaan wakhtiga carruurtu joogaan xannaanada carruurta iyo dugsiga.

Himiladu waa in dhammaan carruurtu ay noqdaan dad deggen oo horumara, kora oo hela aqoonta ay u baahan yihiin marka ay waynaadaan.

Dhammaan carruurtu waa in ay tagaan dugsiga hoose/dhexe

Xilliga dayrta ee sannadka ilmahaagu noqonayo todoba jir ayuu bilaabmayaa sannadka koowaad ee sagaal sannad dugsiyeed oo qasab ah: Sida sharcigu dhigayo waa qasab in dhammaan carruurta iyo dhallinyarada Iswidhan ay tagaan dugsiga. Ardaydu waxa ay helayaan waxbarasho bilaash ah, buugaag bilaash ah iyo qado bilaash ah.

Dugsiga hoose/dhexe waa in dhammaan ardaydu ay ka helaan aqoon aasaasi ah, sida tusaale ahaan af iswidhishka, af ingiriisiga iyo xisaabta. Waxa muhiim ah in ardaydu ay bartaan waxa ay u baahan yihiin, oo intii suurtogal ah ku salaysan mid kasta awooddiisa.

Dugsigu waa in uu carruurta iyo dhallinta u diyaariyaa sidii ay ula noolaan kari lahaayeen ulana dhaqmi lahaayeen bulshada. Waxa kale oo muhiim ah in ay ka baxaan dugsiga iyagoo isku kalsoon oo si wanaagsan ula dhaqmi kara bulshada.

Xiisaha waxbarasho – waa u muhiim nolosha oo dhan

Dugsigu waa in uu ku abuuraa carruurta iyo dhallinta in ay xiiseeyaan waxbarashada, xiisahaasi oo ay ka faa´idi doonaan noloshooda oo dhan.

Dugsigu wuxu raacayaa himilada guud, laakiin waxbarashadu waa in ay ku salaysnaataa arday walba baahidiisa iyo waxa uu xiiseeyo. Ardaydu waxay fursad wayn u haystaan in ay ka qaybqaataan oo — qorsheeyaan oo mas´uul ka noqdaan hawl maalmeedkooda – wakhti walba iyagoo caawimo ka helaya dadka waawayn ee dugsiga.

Dugsi gaar ah

Dugsiga gaarka ah waxa loogu talagalay carruurta iyo dhallinta aan gaadhi karin himilada waxbarashada ee dugsiyada sababtoo ah garaadkooda oo kala dhiman. Waxa la siiyaa waxbarasho ku habboon iyaga oo laakiin intii suurtogal ah u dhiganta waxbarashada lagu qaato dugsiga hoose/dhexe.

Dugsiga gaarka ahi waxa uu ka kooban yahay sagaal sannad-dugsiyeed. Fasalo gaar ah ayaa ka jira dugsiyo dhawr ah oo ka mid ah dugsiyada hoose/dhexe ee Örebro.

Soo qaddimaada bilaabista dugsiga hoose/dhexe

Waad soo dalban kartaa haddii ilmahaagu bilaabayo dugsiga hoose/dhexe isla marka uu noqdo lix jir. Waxa aad ka dalban kartaa adigoo la xidhiidha dugsiga ilmahaagu ku qoran yahay.

Dadka waawayn ee ka shaqeeya dugsiga

Ardaydu waxa ay dugsiga kula kulmaan dad waawayn oo badan. Marka laga reebo macallimiinta waxa jira macallimiinta dugsiga xilliga firaaqada, macallimiinta fasalka lix jirka, macallimiinta takhasuska gaarka ah leh, la taliyaha waxbarshada iyo xirfadaha, kalkaaliso iyo maamulaha. Marmar waxa kale oo jooga shaqaale dheeraad ah oo kala duwan, haddii uu qof u baahan yahay caawimo gaar ah.

Kulanka horumarka iyo xaqa saamayn ku yeelashada

Adiga waalidka ahi waxa aad tahay qofka ugu muhiimsan nolasha ilmahaaga, waana in aad dareento in aad saamayn ku yeelan karto waxbarashada ilmahaaga. Dugsi walba waa in uu ka shaqeeyaa arrimaha dimuqraadiyadda, waxayna tusaale ahaan taas ku suurtogelin karaan iyagoo sameeya guddiga dugsiga oo waalidiintuna ku jiraan.

Ardaydu waxa ay fursad wayn u haystaan in ay ka qaybqaataan oo qorsheeyaan waxyaaalaha dugsiga lagu baranayo – wakhti walba iyagoo caawimo ka helaya dadka waawayn ee dugsiga.

Macallimiintu waxa ay ardayda iyo waalidiinta la yeeshaan kulanka horumarka ugu yaraan hal mar teeramkiiba. Kulanka waxa lagaga hadlaa sida ay tahay waxbarashada ilmuhu, waxana wadajir loo sameeyaa qorshaha horumarka oo gaar ah (IUP) oo loogu talagalay waxbarashada mustaqbalka.

Gaadiidka dugsiga

Carruurta uu dugsigu ka fog yahay waxa ay helayaan gaadiid bilaash ah, laakiin waa dugsiga ilmuhu ku qoran yahay oo kaliya. Waxa guud ahaan shardi ah in ardayga dhigta dugsiga hoose/dhexe uu xaq u leeyahay gaadiid bilaash ah haddii fogaanta u dhaxaysa guriga iyo dugsigu ay ugu yaraan tahay: Saddex kiiloomitir fasalka lix jirka iyo fasalada
1-3, afar kiiloomitir fasalada 4-6 iyo shan kiiloomitir fasalada 7-9.

Ka sokow fogaanta u dhaxaysa guriga iyo dugsiga waxa kale oo xaq u siin kara ilmaha gaadiid bilaash ah haddii ay jirto khatar ku sahabsan waddada ama ay jiraan arrimo gaar ah, tusaale ahaan cudur ama jirro.

Afka hooyo oo aan ahayn af iswidhish

Carruurta leh waalid afkooda hooyo yahay af kale oo aan ahayn af iswidhish waxa ay heli karaan in la baro afkooda hooyo, haddii luqaddu tahay mid ay maalin walba ku hadlaan, tusaae ahaan guriga.

Caruurta afkooda hooyo yahay af kale oo aan ahayn af iswidhish waxa kale oo ay heli karaan in la baro maadadda ” af iswidhishka oo afka labaad ah”. Barashada afka hooyo iyo af iswidhishka oo afka labaad ah, labaduba waxa ay aasaas muhiim ah u yihiin waxbarashada.

Caruurta afkooda hooyo yahay af kale ee waxbarashadoodu u baahan tahay caawimo luqadeed waxa jirta gacanqabashada waxbarashada oo afka hooyo ah.

Caawimo gaar ah

Dhammaan carruurta iyo dhallintu waxay u baahan yihiin in laga caawiyo horumarkooda iyo waxbarashadooda intay dugsiga joogaan. Laakiin xilliyada qaarkood waxa dhici karta in qaarkood u baahdaan caawimo dheeraad ah. Caawimada waxa lagu salaynayaa ardayga baahidiisa iyo awoodiisa. Waxay noqon kartaa in la beddelo habka ay u shaqeeyaan kooxda ardaygu ka tirsan yahay, in la isticmaalo qalab hawsha fududeeya ama qof wayni siiyo caawimo dheeraad ah.

Haddaa rabtid inaa bedeshid dugsiga hoose dhexe

Dugsiyada hoose dhexe ee degmada waxaa qasab ku ah inay marka hore qaataan ilmaha deggan xaafada dugsiga ku yaalo. Markaas ka dib ayuu boos siin karaa ilmaha meelaha kale deggan.

Hadaa rabtid inaa u bedelatid dugsi kale oo degmada leedahay waa inaa dugsiga aad rabtid dalab u geysatid. Shabakada orebro.se waxaad ka aqrisan kartaa macluumaad dheeri ah oo kusaabsan xeerarka dalbashada dugsiyada iyo sidaa sameyn laheyd markaa dalabka sameyneysid.

Takhasusyo

Dugsiyada hoose/dhexe ee Örebro qaarkood ayaa ku takhasusa waxyaalo u gaar ah, inta badan laga bilaabo fasalka 4-aad ama fasalka 7-aad. Haddii aad rabto in aad ogaato takhasusyada iyo waxa ay yihiin waxa aad warbixin ka heli kartaa www.orebro.se ama boggaga dugsiga www.orebro.se/magaca dugsiga.

Dugsiyada hoose/dhexe ee gaarka loo leeyahay

Dugsiyada hoose/dhexe ee gaarka loo leeyahay waxa maamula cid kale oo aan ahayn dawladda hoose. Waxa ay raacaan shuruuc iyo qorshayaal la mid ah kuwa ay raacaan dugsiyada degmadu, waana in ay ogolaansho ka helaan hay´adda dugsiyada.

Degmada Örebro waxa ku yaala dhawr dugsi oo hoose/dhexe oo gaar loo leeyahay. Dugsiyadaasi gaarka loo leeyahay way u furan yihiin dadka oo dhan, laakiin carruurtu toos boos uma helaan ee waa in ay codsadaan si ay u gali karaan. Dugsiyada gaarka loo leeyahay uma baahna in ay fursadda koowaad siiyaan carruurta deggen agagaarka dugsiga.

Maxaa xukuma dugsiga hoose/dhexe?

Heer qaran ahaan waxa dugsiga xukuma sharciga dugsiga iyo qorshaha saacadaha waxbarashada ee golaha wakiiladu go´aamiyo. Dawladdu waxa ay go´aamisaa qorshaha waxbarashada iyo qorshaha koorsooyinka.

Dugsi hoose/dhexe kastaa wuxu go´aamiyaa qorshaha shaqadiisa. Waxa aad qorshayaasha shaqada ka akhrisan kartaa www.orebro.se iyo bogagga gaarka ah ee dugsiyada.

Dugsiga xilliga firaaqada

Dugsiyada xilliga firaaqadu waxa ay sida fasalka lix jirka qabtaan laba shaqo.

Waxa ay taageeraan xaaladdaha koritaanka wanaagsan iyagoo caawinaya och dhiirigelinaya horumarka iyo waxbarashada carruurta, waxana ay fursad u siiyaan waalidiinta sidii ay iskugu wadi kari lahaayeen waalidnimada iyo shaqada ama waxbarashada.

Noocyada daryeelka

Carruurta da´da dugsiga hoose/dhexe waxa ay haystaan noocyo daryeel oo kala duwan wakhtiyada ka baxsan wakhtiga dugsiga:

- dugsiga xilliga firaaqada
- xannaanooyin waxbarasho oo kale
- xarumaha xilliga firaaqada ee furan.

Nooca ugu caadisan daryeelku waa dugsiga xilliga firaaqada (fritids), kaas oo loogu talagalay carruurta ah da´da dugsiga hoose/dhexe.

Laga bilaabo 1 julaay 2009 waxa ay waalidiintu ilmahooda u doori karaan xannaanooyinka waxbarasho ee kale.

Xarumaha xilliga firaaqada ee furan waxa loogu talalgalay carruurta jirta 10 – 12 sano. Carruurta lama geliyo diiwaanka xarunta xilliga firaaqada ee furan ee waalidka ayaa go´aamiya wakhtiyada uu ilmuhu halkaa joogayo.

Carruurta ah da´da dugsiga hoose/dhexe

Carruurta u dhaxaysa lix ilaa laba iyo toban sano ee waalidkoodu shaqeeyo ama waxbarto waxa ay xaq u leeyihiin dugsiga xilliga firaaqada – ee sida caadiga ah loo yaqaan dugsiga maaweelada. Waxa ay joogi karaan dugsiga xilliga firaaqada wakhtiyada shaqada ama waxbarashada ee waalidkooda, oo lagu daray wakhtiga socdaalka ee goobta shaqada iyo dugsiga. Carruurtu boos dugsiga xilliga firaaqada ah ayay heli karaan marka ay jiraan xaalado gaar ahi.

Carruurta waalidkoodu yihiin shaqoraadsade ama ku jira wakhtiga fasaxa waalidku xaq uma laha boosaska dugsiga xilliga firaaqada.

Waa maxay dugsiga xilliga firaaqadu?

Dugsiga xilliga firaaqadu waa hawl kooxeed waxbarasho oo xoojinaysa dugsiga, taas oo carruurta siisa xilli firaaqo oo macno leh iyo taageero horumar. Dugsiga xilliga firaaqadu wuxu u furan tahay caruurta wakhtiga dugsiga ka hor iyo ka dib iyo waliba wakhtiyada fasaxa ah.

Hawlaha dugsiga xilliga firaaqadu waa in ay noqdaan kuwo xiiso leh oo ka duullaya waxa carruurtu xiiseeyaan iyo rabitaankooda, kuwaas oo lagu salaynayo awooddooda kala duwan.

Maxaa xukuma xannaanada carruurta xilliga firaaqada?

Qorshaha waxbarashada ee dugsiga hoose/dhexe (Lgr11) waxa uu khuseeyaa dugsiyada xilliga firaaqada laftooda. Qorshaha waxbarashadu wuxu ka hadlaa in ay dadku isku qiimo yihiin, istixgelinta, deggenaanshaha iyo xiisaha waxbarashada – waxyaalahaas oo ay tahay in ay si cad uga dhex muuqdaan waxbarashada dugsiga iyo dugsiga xilliga firaaqada labadaba.

Codsiga

Badanaa ilmahaaga marka uu bilaabaayo dugsiga xannaanada iyo barbaarinta caruurta waxaad codsaneysaa in boos ilmaha laga siiyo dugsiga xilli faraaqada. Dugsiga xilli faraaqada waxaad ka dalbaneysaa adeegyada elektarooniga ”codsiga dugsiga xilli faraaqada” ”Ansökan till fritidshem” waxaad ka heleysaa shabakada orebro.se.

Dugsiga xilliga firaaqada ee fasaxyada iyo maalmaha waxbarashada macallimiinta

Marka uu ilmuhu joogo dugsiga xilliga firaaqada wakhtiyada fasaxa dugsiga iyo maalmaha waxbarashada macallimiinta oo kaliya (ugu badnaan 15 maalmood teeramkii) waxa la yidhaa meelaynta teeramka. Maalinta ugu dambaysa ee la dalbado meelaynta teeramku waa 1 julaay (teeramka dayrta) iyo 1 jeenaweri (teeramka gugu). Haddii ilmuhu uu tago dugsiga xilliga firaaqada oo uu rabo in uu u beddesho meelaynta

teeramka laguma xidhayo wakhtiga ka bixitaanka heshiiska.

Xannaanada habeenka

Waalidiinta shaqeeya wakhtiga ka dambeeya saacadda 20 ee maalmaha shaqada ama maalmaha fasaxa ah, waxa ay carruurtooda u dalbi karaan xannaanada habeenka. Wakhtiyada shaqada ee waalidka waa in la caddeeyaa oo waraaq caddaynaysa iyo jadwalka shaqada la soo raaciyaa codsiga.

Waa immisa kharashku?

Kharashka laga bixinayo ilmihiiba dugsiga xilliga firaaqadu waa boqolkiiba 2 dakhliga. Kharashka dugsiga xilliga firaaqadu wuxu u shaqeeyaa isla sida xannaanada carruurta, waxa aad bixinaysaa kharash go´an oo aan ku xidhnayn inta saacadood ee uu ilmahaagu halkaa joogo.

Kharashku wuxu ku salaysan yahay dakhliga guud ee reerka uu ilmuhu ku qoran yahay ee ku jira diiwaanka dadka. Haddii aad leedahay carruur kale oo tagta dugsiga xilliga firaaqada ama xannaanada carruurta wuu yaraanayaa kharashku ilmihiiba. Warbixin intaa ka badan oo ku sahabsan kharashka ka akhriso www.orebro.se.

Soo celinta lacagta xannuun dartii

Haddii ilmahaagu maqnaado muddo dheer xannuun daraadeed, waxa laguu soo celinayaa lacagta laga bilaabo maalinta 15-aad ee xannuunka. Waxa aad ku soo codsanaysaa codsiga ku jira www.orebro.se.

Codsiga waa in uu sexeexo maamulaha dugsigu oo caddeeyo in uu ilmuhu maqnaa. Codsiga waxa aad soo diraysaa marka wakhtiga xannuunku uu dhammaado ee uu ilmuhu bogsado.

Keen wakhtiyada

Waa in aad keentaa jadwal marka uu ilmahaagu joogo dugsiga xilliga firaaqada. Jadwalku wuxu sal u yahay qorshaha hawsha. Wakhtiga ilmuhu waa in uu la mid yahay wakhtiga waalidku shaqeeyo ama waxbarto oo lagu daray wakhtiga socdaalka. Waraaqda jadwalku waxa ay ku jirtaa www.orebro.se waxa kaloo ay taallaa dugsiga xilliga firaaqada.

Maalmaha qorshaha ee shaqaalaha

Teeram walba waxa ay shaqaaluhu leeyihiin maalmo waxbarasho hal mar ama dhawr jeer. Markaa waa la xidhi karaa dugsiga xilliga firaaqada. Adiga aan haysan fursad aad ku hesho cid kale oo haysa ilmaha maalmahaas waxa aan kuu samaynaynaa xal ku meelgaadh ah – la xidhiidh dugsigaaga xilliga firaaqada si aad u ogaato sida uu yahay degaankiinu.

Iska dhiibista booska

Marka ilmahaagu uu joojinayo dugsiga xilliga firaaqada wakhtiga iska dhiibistu waa 60 maalmood (qiyaastii laba bilood). Kharashka waad bixinaysaa dhammaan wakhtiga iska dhiibista. Wakhtiga iska dhiibistu wuxu bilaabmayaa maalinta aad soo xerayso codsiga. Codsigu wuxu ku jiraa www.orebro.se ama dugsiga xilliga firaaqada ilmahaaga.

Ilmahaaga si toos ah ayaa looga saarayaa diiwaanka marka uu ka baxo fasalka lixaad.

Warbixin dheeraad ah

Ma doonaysaa in aad wax intaa ka badan ka ogaato dugsiyada hoose/dhexe ee degmada Örebro? Booqo www.orebro.se ama boggaga dugsiga www.orebro.se/magaca dugsiga.

Adigoo sii maraya xarunta telefoonada ee degmada, 019 21 10 00, waxa aad telefoon kula hadli kartaa dhammaan dugsiyadayada iyo siyaasiyiinta mas´uulka ka ah dugsiyada Örebro.

Örebro kommun
Förvaltningen förskola och skola
019-21 10 00
orebro.se

2016
FOTO: LEIF JOHANSSON, KICKI FUNBO, AUGUST ÅBERG/SCANDINAV BILDBYRÅ
PRODUKTION: KOMMUNIKATIONSAVDELNINGEN
TRYCKERI: ÅTTA.45

Miljömärkt trycksak, 3041 0001